



## Waa sharciga! Kuwo loo shaqeeyo waa in ay ku dhejiyaan ogeysiiskan meel ay shaqaaluhu ka akhrin karaan.

Shaqaale kasta waxaa uu xaq u leeyahay dheefaha magdhowga shaqaalaha. Laguuma ciqaabi karo ama takoori karo xareynta ama codsashada xaqsheegashada. Hadaad rabto macluumaad dheeraad ah, wac telefoonka sida bilaashka ah lagu waco **1-800-547-8367**.

### Haddii dhaawac shaqo uu dhaco

Cidda aad u shaqeeyo waxaa lagu caymiyaa barnaamijka magdhowga shaqaalaha ee Waaxda Shaqaalaha iyo Warshadaha. Haddii aad ku dhaawacanto shaqada ama kugu dhaco cudur shaqada laga qaado, waxaad xaq u leedahay dheefaha magdhowga shaqaalaha.

#### Dheefaha waxaa ka mid ah:

**Daryeel caafimaad.** Kharashaadka caafimaad ee ka dhasha dhaawaca ama cudurka goobtaada shaqada waxaa caymiya barnaamijka magdhowga shaqaalaha.

**Dakhliga naafonimada.** Haddii xaaladaada caafimaad ee shaqada la xiriirta ay kaa hor-istaagto in aad shaqeeyo, waxaad xaq u yeelan kartaa dheefo qayb ahaan beddeli kara ujuuradaada.

**Gargaar xirfadeed.** Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa in aad xaq u yeelato caawimaadda dib ugu noqoshada shaqada.

**Dheefaha naafonimada ee qayb ahaan.** Waxaa laga yaabaa in aad xaq u yeelato abaal lacageed si laguugu magdhowo luminta shaqooyinka jirka.

**Lacagta Hawl-gabka La siiyo.** Dhaawacyada sida joogtada ah kuugu diida in aad ku noqoto shaqada ayaa waxaa laga yaabaa in aad xaq ugu yeelato lacagaha hawl-gabka naafonimada.

**Dheefaha dhimashada ee badbaadayaasha.** Haddii shaqaale uu dhinto, xaaska nool ama lammaanaha qoyska diiwaangashan iyo/ ama ku tiirsaneyaashiisa waxaa ay heli karaa lacagaha hawl-gabka.

### Ku saabsan warqadda sawirka ee daabacan ee goobta shaqada ee loo baahan yahay

Waxaad tagtaa [www.Lni.wa.gov/RequiredPosters](http://www.Lni.wa.gov/RequiredPosters) si aad u oggaato wax badan oo ku saabsan warqadaha sawirka ee daabacan ee ka yimaada L&I iyo hay'adaha kale ee dowladda.

### Mareegtada: [www.Lni.wa.gov](http://www.Lni.wa.gov)

Marka la codsado, taageerada luqadda ajnabiga ah iyo qaababka dadka naafada ah waa la heli karaa Wac 1-800-547-8367. Isticmaalayaasha TDD, wac 360-902-5797. L&I waa loo shaqeeyo fursad loo siman yahay.

### Waxa ay tahay in aad sameeyo

**Soo sheeg dhaawacaaga.** Haddii aad dhaawacanto, iyadoon la eegin sida yar ee uu dhaawaca u muuqdo, la xiriir qofka ku xusan warqaddan sawirka ee daabacan.

**Hel daryeel caafimaad.** Marka ugu horeysa ee aad aragto takhtar, waxaad dooran kartaa bixiyaha daryeel caafimaad kasta ee u qalma in uu dhaawacaaga uu daaweeyo. Daryeelka sii socda, waa in uu ku daaweeyo takhtar ku jira shabakada caafimaad ee L&I. (Ka hel bixiyeyaasha shabakada [www.Lni.wa.gov/FindADoc](http://www.Lni.wa.gov/FindADoc).)

Bixiyeyaasha daryeel caafimaad ee u qalma waxaa ka mid ah: caafimaadka, takhaatiirta lafaha iyo murqaha, habka daaweynta ku saleysan riixidda, duugidda iyo dalliiga, daaweynta dabiiciga ah iyo xannaanada lugaha; takhaatiirta ilkaha, arag cabbirayaasha, takhaatiirta caafimaadka indhaha; kaaliyayaasha takhaatiirta; iyo xirfadlayaal kalkaaliye diiwaangashan oo heer-sare ah.

### Usheeg bixiyaha daryeelkaaga caafimaad iyo cidda aad u shaqeeyo dhaawaca ama xaaladda shaqada la xiriirta.

Tallaabada koowaad ee xareynta sheegashada magdhowga shaqaalaha (caymiska warshadaha) waa buuxinta Warbixinta Shilka (ROA). Waxaad kani ku sameyn kartaa online-ka ee FileFast ([www.Lni.wa.gov/FileFast](http://www.Lni.wa.gov/FileFast)), telefoon lambarka 1-877-561-FILE, ama waraaq adiga oo jooga xafiiska takhtarkaaga. Ka xareynta online-ka ama telefoonka waxaa ay dedejinaysaa sheegashada waxaa ayna yareynaysaa walbahaarka.

**Sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtagalka ah u codso sheegashadaada.** Dhaawaca shaqada gudaheeda ah, waa in aad xareeyo sheegashada oo Waaxda Shaqaalaha iyo Warshadaha (L&I) waa in ay ku hesho hal sano gudahiisa ka-dib maalinta uu dhaawaca dhacay. Cudurka shaqada, waa in aad xareeyo sheegashada oo Waaxda Shaqaalaha iyo Warshadaha (L&I) waa in ay ku hesho laba sano gudahooda ka-dib taariikhda uu bixiyaha daryeel caafimaad uu kuugu sheego qoraal in xaaladaadu ay tahay mid shaqo la xiriirta.

### U soo sheeg dhaawacaaga:

(Loo shaqeeyahaaga ayaa buuxinaya meeshan.)

#### Lambarrada taleefoonka ee caawimaadda leh:

Gaadiidka gurmarka degdegga ah

Dabka

Booliska